Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa la waydiiyey: xaga Ilaahay dambigee ugu wayn?, wuxuu yiri: "waa adigoo Ilaahay u sameeya mid la mida isagoo ku abuuray

Cabdillaahi Binu Mascuud -Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa la waydiiyey: xaga Ilaahay dambigee ugu wayn?, wuxuu yiri: "waa adigoo Ilaahay u sameeya mid la mida isagoo ku abuuray", waxaan iri: arinkaasi waa mid weyn, maxaa ku xiga?, wuxuu yiri: "inaad Ilmahaaga disho, adoo ka cabsanaaya inuu wax kula cuno", waxaan iri: maxaa ku xiga? wuxuu yiri: "inaad ka sinaysatid Xaaska Dariskaaga".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, waxaa la waydiiyey kan ugu weyn Dambiyada wuxuuna yiri: Dambiyada shirkigaa ugu weyn, waana inaad Ilaahay u sameyso mid u dhigma ama la mida Ilaahnimadiisa ama Rabinimadiisa ama Magacyadiisa iyo Sifaadkiisa, danbigaasna Ilaahay kuma dhaafo Towbad mooyee, Qofkii sameeyaa haduu ku dhinto Naarta ayuu ku waarayaa. Ka dib waxaa Qofkii ilmihiisa dila isagoo ka baqaya inuu wax la cuno, dilka naftana waa la xarimay, laakiin wuxuu dambigu ku sii waynaanayaa markuu noqdo kan la dilay mid qaraabo dhaw la ah kan dilay, waxa kaloo dambiga sii waynaynaya marka ujeedka dilku noqdo cabsi uu ka qabo kan wax dilay in kan la dilay la wadaago irsaaqada Ilaahay. Ka dib waxaa xiga in ninku ka sinaysto Xaaska Dariskiisa, isagoo dabin u dhigaaya Xaaska Dariskiisa ilaa uu ka sinaysto oo ay u hogaansanto. Sinadu waa xaaraan laakiin wuxuu dambigeedu sii weyn yahay marka mida laga sinaystey ay tahay Xaaska Dariska ee Shareecada Islaamku ku la dardaarantay in la wanaajiyo oo loo baarinimo falo oo dhaqan fiican lagula dhaqmo.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5359